



## Dhacdadii Aragtida ayaa loo qorsheeyay OMSI

Nidaamka Aragtida Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa safar geli doona si ay booska martida uga helaan mid ka mid ah meelaha soo jiidashada leh ee astaanta u ah Portland, OMSI.

Maalinta Sabtida ah, Maajo 11, kooxda muhiimka u ah Aragtida ayaa soo bandhigi doonta bandhig casri ah, macluumaad la isdhaafsano oo ku saabsan shaqadooda ilaa iyo hadda ay qaybteen. PPS waxay qorshaha Aragtiyeed ee 2018 PPS isaga oo ah hab lagu aqoonsanayo isla markaana lagu qeexayo waxay ay PPS noqon karto, waxa ay tahay in ay noqoto, iyo sida ardayda, shaqaalaha, qoyska iyo bulshadu ay u heli karaan “North Star” la qeexay oo la isla wadaagay oo loogu talagalay degmada.

Bilihii [Janaayo](#), [Febraayo](#) iyo [Maarso](#), degmadu waxay qabatay kulamo badan oo ay la yeelatay wax daneeyayaal ka kala socda meelo badan isla markaana leh qaaab-dhismeedka kala duwan. Iyada oo la adeegsanayo tababar, kooxda muhiimka ah iyo Isbahaysiga Dhanka Tilmaanta ‘Guiding Coalition’ ayaa bilaabay in ay sameeyan aragti

- **Sawirka Qalin jabinta:** Maxay yihiin aqoonta, xirfadaha, dabeecadaha iyo fikirka ay ardaydu u baahan doonaan si ay ugu guuleystaan noloshooda iyo xirfadahooda shaqo?
- **Sawirka Dadka Waaweyn:** Maxay yihiin aqoonta, xirfadaha, dabeecadaha iyo fikirka ay dadka waaweyni u baahan doonaan si ay ardayda uga taageeraan in ay helaan Sawirka Qalin jabinta?
- **Isbeddelka Nidaamka:** Sidee baa degmada oo dhani ugu baahan tahay in ay wax beddesho si ay u taageeraan guusha ardayda?

Maajo 11 dhacdada ka dhacaysa OMSI ayaa laga heli doonaa fursad lagu bixiyo jawaab celin ku saabsan aragtida degmada iyada oo PPS ay ku jirto dhammeystirka qaybtii u dambeysay aragtida oo Juun dhacaysa.

Ka soo qayb galayaashu ma aha in ay soo galaan madxafka si ay soo aadaan dhacdada Aragtida. Soo gelitaanka madxafka qiime dhimis ayaa lagu sameyn doonaa Maajo 11 taasi loogu talagalay xubnaha ka tirsan PPS oo dadka waaweyn iyo carruurta bixinayaan \$12. (Bandhiga “The Science behind Pixar” wuxuu socon doonaa maalintaasi.) PPS waxay bixin doontaa fursad soo gelitaan oo lacag la’aan ah oo ay helayaan ardayda iyo qoysaska baahiyaha ugu sareeya qaba dugsiyadeena.



